

In la codeeyo

Maalinta axadda ee 26 Mey 2019 waxaa loo codeynayaa Baarlamaanka Midowga Yurub.

Val 26 maj 2019

EUROPAPARLAMENTET

Yaa codeyn kara?

Waxaad xaq u leedahay in aad codeysid haddii aad tihid muwaadin iswiidhish ah, aadna ka diiwaangashantahay ama ka diiwaangashaneyd Iswiidhan. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay in aad codeysid haddii aad u dhalatay waddan ka mid waddamada xubnaha ka ah Midow Yurub, ka diiwaangashantahay Iswiidhan, iskuna qortay diiwaanka codbixiyayaasha. Waana in aad 18 sano buuxisay ugu dambeyn maalinta codeynta.

Haddii aad xaq u leedahay in aad codeysid waxaad heleysaa kaar codeyn

Adigaaga xaq u leh in aad codeysid waxaa seddax usbuuc doorashada ka hor boostada kuugu imaanaya kaarka codbixinta. Kaarka codbixinta waxaa ku yaalla magaca, cinwaanaka iyo waqtiyada ay goobaha cod bixintu furanyihiin. Waxaa xitaa ku yaalla meelo tusaale ahaan horay looga sii codeyn karo. Haddii aadan haysan kaarkaaga codbixinta mid cusub ayaad ka dalban kartaa degmada ama Valmyndigheten.



Waraaqaha codeynta

Waraaqaha codeyntu waxay yaallaan meel kasta oo aad ka codeyn kartid iyo xisbiyada agtooda.

Xisbi u codey

Hor iyo horraanba waxaad u codeyneysaa xisbi. Magaca xisbigu wuxuu ku yaallaa waraaqaha cod bixinta. Haddii aadan magaca xisbiga ka helin waraaqaha cod bixinta, warqad cod bixin oo cad ayaad ku qori kartaa magaca xisbiga. Si muuqata u qor.

Qof u codeyn

Haddii aad rabtid in aad dooratid qof ka mid ah dadka xisbiga u sharraxan, waxaad istallaab saari kartaa magaca musharraxa hortiisa ee waraaqda doorashada. Waxaad istallaab u saari kartaa hal musharrax oo keliya. Qof xitaa waad u codeyn kartaa adigoo magaca xisbiga iyo magaca musharraxa ku qoraya warqad cod bixin oo cad.

Codeyn

Goobta cod bixinta ee xaafaddaada ka codey maalinta cod bixinta ee 26 Mey

Waxaad ka codeyn kartaa oo keliya goobta doorashada ee kaarkaaga cod bixinta ku qoran. Goobta doorashadu waxay furantahay oo keliya maalinta doorashada. Marka aad ka codeysid goobta doorashada waxaa lagaa saxayaa diiwaanka codbixiyayaasha, codkaagana waxaa lagu ridayaa sanduuqa codeynta.

Horay uga sii codey degmadaada ama degmo kale

Goob kasta oo codbixin oo waddanka ka mid ah horay waad oga sii codeyn kartaa inta aan doorashada la gaarin. Horay u sii codeyntu waxay billaabataa qiyaas ahaan seddax usbuuc ka hor maalinta codbixinta, waxayna socotaa ilaa iyo maalinta codbixinta. Macluumaadka ku aaddan meesha aad horay uga sii codeyn kartid waxaad ka heleysaa degmadaada ama bogga www.val.se.

Waxaa khasab ah in aad haysatid kaarka codbixinta marka aad horay usii codeyneysid.



Valmyndigheten

Dibadda waddanka ka soo codey

Haddii aad joogtid dibadda waddanka waxaad codkaaga ku soo diri kartaa boosto ama waxaad ka codeyn kartaa safaarado iyo qunsuliyado iswiidhish ah oo fara badan. Si aad boosto ugu soo dirtid codkaaga waa in aad isticmaashid qalab gaar ah oo laga dalbado Valmyndigheten, degmooyinka, safaaradaha ama qunsuliyadaha.

Caawimaadda codeynta

Wakiil codeyn

Haddii, sababo la xiriira cudur, cuuryaannimo ama da'aadda, aadan tegi karin goobaha codbixinta waxaad beddel ahaan codeyn kartaa adigoo wakiil adeegsanaya. Waxaad sidoo kale adigoo wakiil adeegsanaya codeyn kartaa haddii aad ku jirtid xabsi xukun ku sugid ama aad ku xirantihid mid ka mid ah xabsiyada ciidamada usbluubta. Si aad u codeysid adigoo wakiil adeegsanaya waxaad u baahantahay qalab aamin an oo aad ka dalbanaysid degmada ama Valmyndigheten.

Dadka soo socda ayaa wakiil noqon kara:

- Ninka, xaaska ama qofka loo wada noolyahay sida dad isqaba ahaan
- Carruurta ninka, xaaska ama carruurta qofka loo wada noolyahay sida xaas ahaan, carruurtaada carruurteeda, waaliddiinta ama walaalaha
- Kuwa xirfad ahaan daryeelka ku siiya ama kaa caawiyaan baahida qof ahaaneed
- Kuwa ka shaqeeya xabsiga xukun ku sugidda ama xabsiga ciidamada usbuubta

Wakiilku waa in uu jiraa ugu yaraan 18 sano, uuna ku tusi karo aqoonsigiisa.

Cod qabte wareegaya

Haddii aadan aqoonnin cid wakiil kuu noqon karta waxay degmadaadu abaabuli kartaa cod qabte guriga kuugu imaanaya. Wixii macluumaad ah oo dheeraad ah kala xiriir degmadaada.

Waa in aad xaqiijisaa aqoonsigaaga

Si aad u codeysid waa in aad xaqiijisaa aqoonsigaaga. Haddii cod qabtuhu uusan ku garaneyn waa in aad tustaa aqoonsigaaga, tusaale ahaan leysin gaari ama baasaboort. Haddii aadan aqoonsi haysan waxaa ku caddeyn karta qof kale, laakin waa in qofkaasi uu aqoonsigiisa tusaa.

Kalandaariyada doorashada Midow Yurub ee 2019

11 Abriil	Waqtiga ugu horreeya waraaq dibadda looga soo codeyn karo.
26 Abriil	Xaqaaga codeynta waxaa la go'aaminayaa iyadoo laga duulaya diiwaanka dadweynaha ee Skatteverket.
2 Mey	Taariikhda ugu horreysa ee laga codeyn karo safaaradaha iyo qunsuliyadaha dibadda.
8 Mey	Horay usii codeynta ayaa Iswiidhan ka billaabaneysa.
26 Mey	Maalinta codeynta.